# Qofka adigoo kale ah oo denbi-fal loo geystay

اطلاعات برای قربانیان جرائم

Informationen für Opfer von Straftaten

Información a las víctimas de crímenes

Informations aux victimes d’actes criminels

Warbixin loogu talagalay dhibbaneyasha denbi-falka

Informacia bašo phagibaskoro kurbani

Information till brottsoffer

ИНФОРМАЦИЯ ДЛЯ ЖЕРТВ ПРЕСТУПЛЕНИЙ

Informacija za osobe oštećene krivičnim djelom

Information to crime victims

Suç mağdurlarını bilgilendirme

معلومات إلى ضحايا الجرائم

Tiedote rikoksen uhreille

BROTTSOFFERMYNDIGHETEN


# QOFKA ADIGOO KALE AH OO DENBI-FAL LOO GEYSTAY

© Hey'adda Ammuuraha Dhibbaneyaasha [Brottsoffermyndigheten], 2015
Masawir-gacmeed: Maria Wall
Soo-saare: Plakat
Madbacada: Tryckeri City, Umeå 2015

# Tusamada


| | |
|---|---|
| **Hogaamin fudud** | **6** |
| **Hordhac** | **7** |
| **Waxkaqabadka degdegga** | **8** |
| **Wargelinta ciidanka booliska** | **9** |
| **Hordhaca baaritaanka denbi-falka** | **10** |
| **Taageero iyo caawimaad** | **12** |
| **Maxkamadaynta** | **16** |
| **Magdhaw, caymis iyo gunnada dhaawaca denbi-falka** | **19** |
| **Badbaadin-shaqsiyadeed** | **22** |
| **Fal-celinta dhibbaneyaasha denbi-falka** | **24** |
| **Faahfaahinta xiriirka** | **25** |
| **Liiska ereybixinta** | **27** |

# Hogaamin fudud



# Hordhac

Kolka denbi lagu geysto waxaa sida caadiga ah ku la soo gudboonaata xaalad aadan horey u soo marin oo welwel iyo shaki ku gelisa. Haddiise dacwada denbi-falka ciidanka booliska loo gudbiyo, waxaa bilaabanaaya dhacdooyin isdabajoog ah oo hey'ado badan ay ka qaybgalaan ku hawlanaanteeda. Waxaa dhici karto in aysan ahayn arrin sahlan sida loo helo, warbixin ku saabsan halka taageero laga heli karo iyo jawaabta su'aalahaaga. Waxaan rajeynaynaa in qoraalkan aad ka hesho jawaabta su'aalahaaga badidooda, iyo halka aad jawaabta su'aalaha kale kala xiriiri karto.

Waxaan ku bilaabaynaa warbixin ku saabsan sida ciidanka booliska loo wargeliyo denbi-falka, dhacdoonada wargelinta kaddib iyo fursadaha taageerada iyo caawimaada aad heli karo.

Kaddibna waxaannu qeexeynaa maxkamad soo-saaridda, suurtagalka in magdhaw dhaqaale ah laga siiyo daawacyada ka soo gaarey denbigii laga galay iyo sidii loo qaadi lahaa tallaabooyin suurtagal ah oo ammaankaga lagu xoojiyo.

Ugu dambeyntii waxaynu wax ka qoreynaa sida caadi ahaan looga fal celiyo denbi-falka. Waxaa kaloo halkan ku lifaaqan ereybixinta iyo liiska xiriirka ururrada samafalka iyo hey'adaha dowladda.

# Waxkaqabadka degdegga

**Haddii dhaawac lagu geysto – daryeel-caafimaadeed raadso! Haddii lagu geysto dhaawac u baahan in hab degdeg ah wax looga qabto, wac 112 ama booqo rugta daryeel-caafimaadeedka degdegga ee kugu dhow.**

**Haddii dhacdoonta denbi-falka u weli socdo wac 112 ama booqo saldhigga ciidanka ciidanka booliska kugu dhow!**

**Waxaadna tegi kartaa xarunta ciidanka booliska kugu dhow ama kala xiriiri kartaa khadka taleefanka 114 14 ama shabakadda internetka ciidanka booliska www.polisen.se**

**Haddii aad u baahan tahay magangelyo ama taageero – la xiriir ciidanka booliska, Maamulka adeegga bulshada, Heeganka dumarka ama heeganka dhibbaneyaasha.**

# Wargelinta ciidanka booliska



Dadyoowga badidoodai waxay isweydiiyaan waxa dhici doona wargelinta ciidanka booliska kaddib. Hal su'aal kaloo iyaduna muhiim ah waxay tahay, maxaa dhici doona haddii aadan adigu ama cid kale ciidanka booliska denbi-falkas la wargelin.

Inaad wargeliso ciidanka booliska waxay lagama maarmaan u tahay, sidii xuquuqdaada loo sugi lahaa oo lagu ilaalin lahaa. Shirkadaha caymiska iyo Hey'adda Ammuuraha Dhibbaneyaasha denbi-falka waxay caadi ahaan dalbayaan nuqulka wargelinta ciidanka booliska si ay wax uga qabtaan arrimaha la xiriira gunnada dhaawaca denbi-falka.

Sidaas awgeed, waa inaad dhaqso ciidanka booliska ugu wargelisaa kolka denbifal lagu geysto. Waxaadna tegi kartaa xarunta ciidanka booliska kugu dhow ama kala xiriiri kartaa khadka taleefanka 114 14 ama shabakadda internetka ciidanka booliska www.polisen.se. Haddii dhacdoonka denbi-falka u weli socdo wac 112.

Iyagoo ku salaynaya wargelintii la soo gudbiyey ayaa ciidanka booliska ama xeerilaaliyeha go'aaminayaan in den-bibaaris hordhac ah la bilaabo.

Ciidanka booliska iyo xeerilaaliyeha waxay inta badan ku siin karaan wixii warbixin ah oo aad u baahan tahay. Taasina waxaan ku soo qaadi doonnaa qaybaha dambe ee qoraalkan, laakiin haddii la soo koobo taas micneheedu waxa weeye in ciidanka booliska iyo xeerilaaliyaha ay waajib ku tahay in ay warbixin ka siiyaan:

- fursadaha aad leedahay in magdhaw laga siiyo dhaawaca iyo dhibta ka soo gaaray denbi-falka
- in xeerilaaliyaha ay badanaaba waajib ku tahay inuu soo diyaariyo oo maxkamadda horkeeno codsigaaga magdhawga
- xeerarka ku saabsan booqasho-mamnuuca, qareenka dhibbaneha iyo qof taageere ah
- fursadaha caawimaad iyo tala-siin xagga sharciga
- hey'adaha iyo ururrada bixiya taageero iyo caawimaad
- haddii denbi-baaris hore aan la bilaabin ama laga noqdo
- haddii eedeysaneha denbi-falka lagu soo oogo ama aan wax denbi ah ba lagu soo oogin.

Shabakadda internetka www.jagvillveta.se waxaad ka aqrisan kartaa warbixin ku saabsan denbi-falka, taageero iyo caawimaad oo carruurta iyo dhallinyarada loogu talagalay.

# Hordhaca baaritaanka denbi-falka



Kolka xeerilaaliyaha ama ciidanka booliska ugu muuqato in denbi-fal dhacay, waxay bilaabaan hordhaca baaritaanka denbi-falka. Waqtiga hordhaca baaritaanka denbi-falka u socdo waxaa su'aallo denbi-baaris la weyddiinayaa eedeysane iyo ciddii kale oo ka warbixin karta, sida adiga oo denbi-falka lagu geystey ama wixii markhaatiyo jira. Dhammaan arrimaha ka soo baxa baaritaanka waxaa lagu ururiyaa brotokoolka hordhaca baaritaanka denbi-falka.

Ciidanka booliska ma haysto dhaqaale iyo hawlwadeenno ku filan oo uu dhammaan denbiyada la galo si dhaqso ah u baaro. Ciidanka booliska ayaad weydiineysaa haddii aad dooneyso inaad ogaato goorta qiyaastii la bilaabayo baaritaanka dacwadaada.

Kolka denbi lagu geysto waxaa lagu magacaabaa dhibbane ama muddici. Maadaama aad dhibbane tahay waxaa lagu la yeelanayaa waraysi aad ciidanka booliska ama xeerilaaliyaha ku wargeliso waxa aad ka ogtahay denbi-falka. Mararka qaarkood waxaa dhacda inaad wargelinta taleefan ku soo gudbiso, laakiin haddii lagugu yeero waraysi awgiis waxaa kugu waajib ah inaad timaaddo.

Haddi aad ku maqnaato sabab la'aan waxa dhic kara in ciidanka booliska ku soo kaxeeyo waraysiga awgiis. Waxaad xaq u leedahay inuu ku soo raaco qof ku taageera, warbixin dheeraad ka aqriso halka ay ku qoran tahay Taageero iyo caawimaad.

Haddii ciidanka booliska ama xeerilaaliyaha ku yeeraan, waxaad xaq u leedahay in lagu gudo kharashkii kaga baxay imaatinkii waraysiga awgiisa. Waxaa kaloo dhici kara in lagu gudo kharashka socdaalka, jiif iyo raashin, mushahar ka lummay ama dakhligii ku soo geli lahaa. Soo celinta dakhliguu ku soo geli lahaa waa lacag caddadan. La xiriir ciidanka booliska oo codso kharash-celinta noocaan oo kale.

Haddii aad dooneyso inaad dalbato magdhaw laga siiyo dhaawacyadii ka soo gaaray denbi-falka, waxaad arjiga codsiga u gudbineysaa ciidanka booliska ama xeerilaaliyaha hordhaca baaritaanka denbi-falka wada. Warbixin dheeraad ah ka aqriso halka ay ku qoran tahay magdhawga waxyeellada iwm.

## Ciribtiridda dacwada

Hordhaca baaritaanka denbi-falka waa la joojinayaa haddii aysan jirin sababo loo sii wado. Taasina waxay dhici kartaa kolka arrintu u muuqato inaan denbi-fal dhicin ama usan jirin qof la tuhunsan yahay. Sabab kale waxay noqon kartaa in aysan raad hordhaca baaritaanka denbi-falka loo raaco jirin. Waxaa muhiim ah in la ogaado in den-bibaaris laga noqday dib loo furi karo, haddii ay soo ifbaxaan caddaymo cusub.

Kolka xeerilaaliyaha ama ciidanka booliska go'aamiyaan in hordhaca baaritaanka denbi-falka laga noqdo, waxaa sida caadiga ah lagu wargeliyaa adiga dhibbaneha ah. Waxaa sidaas oo kale ah kolka xeerilaaliyeha go'aamiyo in aan den-bibaaris la bilaabin ama aan dacwad denbi la soo oogin.

Haddii aadan ku qanacsanayn go'aanka ciidanka booliska waxaad la xiriiri kartaa xeerilaaliyaha si uu dacwadaada dib ugu eego. Haddiise aadan ku qanacsanayn go'aanka xeerilaaliyaha waxaad la xiriiri kartaa xeerilaaliyaha ka sarreeya si uu arrinta dib ugu baaro. Haddii fal den-bibaaris la joojiyey uu muujiyo in ay xaqiiqada u dhowdahay in denbi-fal lagu geystey, waxaad kolka xaq u yeelan kartaa magdhaw aad caymiska ka hesho ama gunnada dhaawaca denbi-falka.

## Denbi-fal ku soo oogid

Haddii xeerilaaliyeha u arko in u haysto caddaymo u maxkamadda hor keeni karo, kuwaasoo suurtagelin kara in maxkamadda ay eedeysaneha xukunto, wuxuu go'aaminayaa denbi-fal ku soo oogid Markaas kaddib maxkamadda waxay isugu yeeraysaa maxkamadaynta sidii looga arrinsado denbi-fal ku soo oogida. Hadba waxyaalihii soo ifbaxay xilliga maxkamadaynta waxay maxkamaddu go'aan ka gaaraysaa haddii eedeysaneha denbi-falka lagu xukminaayo iyo in kale. Maxkamadda waxay kaloo go'aan ka gaarasysa heerka magdhawga uu denbiiluhu adiga ku siin doono, waa haddii aad codsato.

## Ciribtirida fal-denbi ku soo oogidda

Inkastoo ay jirto caddayn ku filan in xukun ciqaab ah dhaco, haddana wuxuu xeerilaaliyeha awood u leeyahay in uusan wax fal-denbi soo oogin, wuxuu beddelki wargelinayaa ciribtirida fal-denbi ku soo oogidda [åtalsunderlåtelse]. Taasi waxay tusaale ahaan dhici kartaa kolka qofku galay fal-denbi-falka u da'yar yahay, qof aan horey loo ciqaabin oo ku kacay fa-denbi aan sidaas u waynayn. Taasi waxay kaloo suurtagal noqon kartaa haddii qofku dhawaan fal-denbi kale awgiis ciqaab lagu xukmiyay, lana aaminsan yahay in denbi-falka kale awgiis aan lagu kordhin doonin ciqaabta.

Maxkamadayn ma jiri doonto haddii xeerilaaliyehu u go'aamiyo ciribtirida fal-denbi ku soo oogidda. Iyadoo sidaasi tahay ayaa haddana caymis ama magdhawga dhawaaca denbi-falka ka heli kartaa magdhawga dhaawacyadii lagu geystay.

## Ciqaabta

Xeerilaaliyen wuxuu sidoo kale go'aamin karaa ciqaab ganaax ah haddii denbigu yahay mid fudud oo uu eedaysanaha qirtay, taasoo loo yaqaanno [strafföreläggande]. Xaaladaas eedaysanaha maxkamad lama hor keeni doono, laakinse waxtarka go'aanka ganaaxa iyo xukunka waa isku mid. Go'aanka ganaaxa ee xeerilaaliyeha wuxuu eedaysanaha ku qasbi karaa in uu magdhaw bixiyo.

## Haddii da'da eedeysane 15 sano ka hooseeyso

Qofka ka yar 15 sano ma gaarin da'dii ciqaabta, sidaas qaangaar ma aha oo maxkamad lama soo taagi karo. Wargelinta dacwadda ciidanka booliska loo gudbiyaa ma horseedeyso in maxkamad la soo taago, laakiin waxaa la wargelinayaa maamulka adeegga bulshada [socialtjänsten] oo qaadi kara tallaabooyin. Ciidanka booliska wuxuu awooda in uu ku dhaqaaqo denbi-baaris ama haddii maamulka adeegga bulshada ka codsado. Ciidanka booliska wuxuu waraysi la yeelan karaa dhamman dadyoowga dacwadu saamayso.

Waa muhiim hordhaca baaritaanka denbi-falka muujineysa in denbi-fal dhacay, waayo wuxuu dhibbanuhu xaq u yeelanayaa inuu magdhaw helo. Magdhawgu marnaba meesha kama maqna maadaama uu xataa qofka 15 sano ka yar lagu yeelan karo magdhaw.

## Dhexdhexaadinta denbi-falka awgiis

Dhexdhexaadinta micneheedu waxa weeye in qof dhexdhexaad ah ay is horkeento dhibbaneha iyo eedaysanaha si ay uga wadahadlaan habka falka denbigu u dhacay. Haddise da'da eedaysanaha ay 21 sano ka hooseeyso, waxaa maamulka degmada khasab ku ah in ay ku dhaqaaqaan dhexdhexaadin.

Shuruudda dhexdhexaadintu waxa weeye in denbi-falka la qirtay. Teeda kale, waa in labada dhinacba ay raali ka yihiin. Dhexhdexaadintaasi waxay horseedi kartaa heshiisyo uu ka mid yahay sida loo dhaqmayo haddii mustaqbalka la iska horyimaado, taasina waxay dhibbaneha denbi-falka u noqon kartaa ammaan.

Heshiiska lacagta magdhawga dhaawacyada ayaa dhibaato keeni karta kolka arrinta ay ku saabsan tahay tirada badan ee eedeysaneyaasha, lacag badan ama dhaawacyada badan ee dhibbaneha. Wixii su'aallo xiriir la leh arrintaan kala xiriir Hey'adda Ammuuraha Dhibbaneyaasha. Waxaa ka lummi kara magdhaw dhaawaca denbi-falka awgiis ku soo gaaray [brottsskadeersättning] haddii aad gasho heshiiska magdhawga dhaqaalaha.

# Taageero iyo caawimaad

## Taageerada xagga sharciga



### Qareenka dhibbaneha

Falalka denbiyada qaarkood waxaad adiga oo ah qofka dhibbaneha ah, xaq u leedahay qof garyaqaan ah oo adiga ku gaar ah, kaasoo loo yaqaanno [målsägandebiträde]. Taasi waxay badanaa ku saabsan tahay denbiyada jinsiga sida kufsashada, faleha qoyska ka tirsan oo xoog-muquunis adeegsada iyo xitaa denbi-falalka kale, waa haddii baahi ay jirto. Garyaqaanka dhibbaneha waxaa la magacaabi karaa markii hordhaca baaritaanka denbi-falka la bilaabo.

Haddii aad u baahan tahay garyaqaanka dhibbaneha waa inaad sida ugu dhaqsaha badan uga la xaajootaa xeerilaaliyaha ama ciidanka booliska hordhaca baaritaanka denbi-falka u xilsaaran. Waxaa kaloo codsigaaga toos ugu gudbin kartaa maxkamadda derejada koowaad.

Maxkamadda ayaa go'aan ka gaaraysa xaq u yeelanshada garyaqaanka dhibbaneha oona ku magacaabi doonto. Haddii aad doonayso waxaad soo gudbin magaca garyaqaanka dhibbaneha. Garyaqaanka dhibbaneha oo badi ahaan ah qof qareen, hawshiisu waxay tahay inuu ilaaliyo danahaaga uuna ku siiyo taageero iyo caawimaad inta ay socdaan hordhaca baaritaanka denbi-falka iyo maxkamad soo saarka. Garyaqaanka dhibbaneha wuxuu kaloo wakiil ku noqon karaa xilliga maxkamadaynta iyo in u ku codsado magdhawga.

Caawimada garyaqaanka dhibbaneha waa lacag la'aan. Laakiin kolka maxkamadaynta dhammaato hawshiisuna waa ay dhammaatay oo kama caawini doono in lagu siiyo magdhaw ama kharash-celin kale.

### Wakiilada carruurta u gaarka ah

Haddii xilhaayeha xannaanadda/waalidka (oo badanaaba qof waalid ah) lagu tuhunsan yahay inuu denbi-fal ka galay carruurtiisa, waxaa carruurta loo qabanayaa wakiil iyaga u gaar ah. Taas oo kale waxay dhacaysaa haddii qofka denbi-falka lagu tuhunsan yahay uu xiriir gacaltoyo la leeyahay xilhaayeha xannaanadda/waalidka. Wakiilku wuxuu ilaalinayaa xuquuqda carruurta inta hordhaca baaritaanka denbi-falka iyo dacwadda maxkamaddu socdaan.

Wakiilka gaarka wuxuu noqon karaa qof qareen ah, kaaliyeha garyaqaanka ama qof kale. Teeda kale, wakiilku waa in uu aqoon iyo khibrad u leeyahay arrimaha noocan ah oona u qalmo hawlaha noocaan ah.

### Caymiska ammuuraha caddaaladda

Tusaale ahaan waxaa caymiska guriga ku jira caymiska ammuuraha caddaaladda. Taas micneheedu waxa weeye in caymisku u ka caymin doono kharashka wakiil iwm waa haddii arrinta magdhawga aan maxkamadda la hor keenin. Sida caadiga ah waxaa jira shuruud ah inaad bixiso qayb ka mid kharashyada oo loo yaqaan [självrisk]. La xiriir shirkadda aad caymiska ku leedahay si aad u hesho warbixin dheeraad ah.

### Talasiin xagga sharciga

Sida hadba ku xusan Xeerka caawimaada sharciyada waxaad xaq ku leedahay talasiin xagga sharciga ku saabsan dhammaan noocyada dacwooyinka iyo arrimaha kale. Waxay noqon kartaa tusaale ahaan codsi magdhawga haddii xeerilaaliyaha usan arrintaas ka caawinin ama aad la xaajooneyso shirkadda caymiska.

Warbixin xiriir la leh Xeerka caawimaada sharciyada waxaad ka la xiriiri kartaa xafiis qareen. Haddii aad bixiso kharash waxaa talasin lagu siin karaa ugu badnaantii laba saacadood. Kharashkuna waa 1800 kr saacaddiiba. Iyadoo la eegayo xaaladdaada dhaqaale ayaa kharashka wax laga dhimi karaa.

### Caawimaadda ammuuraha caddaaladda

Haddii aadan lahayn caymiska ammuuraha caddaaladda [rättsskydd], oona arrintaada wax looga qaban karin kaddib markii talasiin xagga sharciga la adeegsaday, waxaa lagu siin karaa caawimaadda ammuuraha caddaaladda [rättshjälp] waa kaddib markii baahidaada laga arrinsado. Xaaladaas dowladda ayaa bixisa qayb ka mid ah kharashka qareenka lagu qabtay. Waxaa kaloo laga caawini karaa kharash kaaga baxa qorallada caddaymaha, socdaalada, raashin iyo jiif iyo kharashyo kale.

Warbixin ku saabsan qaabka caawimaadda ammuuraha caddaaladda loo codsado waxaad ka heli kartaa qof garyaqaan ah, maxkamadda ama Hey'adda caawimaadda ammuuraha caddaaladda [Rättshjälpsmyndigheten].

## Noocyada taageerada ee kale

### Maamulka adeegga bulshada

Maamulka adeegga bulshada ee degmo kasta waxaa waajib ku ah in dhibbaneha denbi-falka iyo eheladiisa ay siiyaan taageero iyo caawimaad. Mas'uuliyadaas waxay ku qeexan tahay Xeerka adeegga bulshada [Socialtjänstlagen].

Maamulka adeegga bulshada waa in uu fiirogaar siiyaa dumarka xoog muquuniska loo geystay, falehuna u qoyska ka tirsan yahay. Waxay u baahnaan karaan taageero iyo caawimaad ay xaaladdooda wax uga beddelaan. Maamulka adeegga bulshada waa inuu sidoo kale fiirogaar u yeeshaa carruurta, goobjoog ka ahaa markii falka xoog muquuniska ku salaysnaa loo geystay qof qoyska ka tirsan, ama faleha u ahaa qof qoyska ka tirsan. Carruurtaas waa dhibbaneyaal waxaana Maamulka adeegga bulshada xil saaran in ay helaan taageerada iyo caawimaadda ay u baahan yihiin.

Waxay noqon karaan taageero kala nooc ah oo xiriir la leh bulshada iyo caafimaadka maanka, iyo xitaa kaalmo-dhaqaaleedka iyo caawimaad wax ku ool ah.

Degmooyinka qaarkood waxaa laga hela taageero oo noocyo kale ah, tusaale taageerada wada-hadalka ku salaysan ee dhibbaneha denbi-falka loogu talagalay, xarunta taageerada ee dhibbaneha denbi-falka da'da yar loogu talagalay iyo hoyga carruurta. Warbixin dheeraad waxaad kala xiriiri kartaa Dowladda hoose.

### Taageere

Haddii aad tahay dhibbane u baahan taageero waqtiga hordhaca baaritaanka denbi-falka ama maxkamadaynta waa soo kaxaysan kartaa qof taageere ku noqda. Waxaad dooran kartaa qof aad horay u taqaannay ama waxaad la xiriiri kartaa maamulka adeegga bulshada ama mid ka mid ah heeganka dhibbaneyaasha denbi-falka ama heeganka dumarka, kuwaasoo laga warbixin doono isla qoraalkaan.

Qofka taageeraha ahi wuxuu ka caawini karaa inaad isdejiso oo welwel iyo walbahaarka yarayso. Waxtar ayeyna yeelan kartaa kolka laga hadlo qof goobjoog ahaa wixii waraysiga hordhaca baaritaanka denbi-falka iyo maxkamadaynta dhacay. Sida qaabka go'aanka ama xukunka maxkamadda loo qeexay. Waxaad yeelan kartaa garyaqaanka dhibbaneha iyo qof taageere ah. Taageeruhu waxa gunno ah kama helayo hey'adda caddaaladda.

## Turjubaan

Haddii aannaad af-iswidishka ku hadlin, haddii uu hadalku kugu adag yahay ama dhegaha aannad wax ka maqleynin, waxaad xaq u leedahay in lacag la'aan lagu qabto turjubaan, inta ay socoto baaritaanka Booliska iyo maxkamadaynta. Sidaas oo kale waxaad xaq u leedahay qof turjubaan ah, markii tusaale ahaan aad la xiriirayso hey'adaha dowlada, sida Maamulka adeegga bulshada.



## Taageeraha markhaatida

Xilka taageeraha markhaatigu waxaa weeyaan in caawinno markhaatida iyo dhibbaneha, iyo in goobjoogiisa ku muujiyo maxkamadaynta kahor iyo kaddib ba. Ujeedaddu waa in kor loo qaado ammaanka goobaha guud maxkamadda, tusaale ahaan qolka martida iyo in markhaatida u qeexan qaabka maxkamadaynta. Haseyeeshe taageeraha markhaatida looma oggola in uu dhinac qabsado, ka arrinsado denbi-falka maxkamadda horteeda la keenay.

Maxkamaddaha badankooda waxaa markhaatiga ama dhibbaneha loo diyaariyaa qol gooni ah. Hawlaha taageerada markhaatida, waxay hadda dalka Iswiidan maamulkoodu hoos yimaadaa maxkamadaha darajada koowaad iyo maxkamadaha rafcaanka ee dalka Iswiidan.

Hey'adda Ammuuraha Dhibbaneyaasha waxaa wadajir Hey'adda maxkamadaha xil saaran hirgelinta dhaqdhaqaaqa taageerada markhaatiyada. Waa dhaqdhaqaaq samafal ku salaysan, waxaana badi ahaan hirgeliya heeganada dhibbaneyaasha, waxaana maamula isku-duweha taageerada markhaatida ee degmada, kaasoo lagala xiriiri kara maxkamadda.

# Taageerada ururrada samafalka

Waxaa jira ururro samafal oo taageera iyo caawina dadyoowga denbi-falka loo geystay. Kuwa waxaa ugu caansan waxaa weeyaan heeganada dumarka iyo heeganada dhibbaneyaasha denbi-falka, kuwaasoo meelal fara badan oo wadanka ku yaalla ka hawlgala. Intaas waxaa dheer, oo iyana jira, tiro ururrada dhibanayaasha denbi-falka oo aqoon gaar ah arrimahaan u leh. Heeganada waawayn waxaa ka hawlgala shaqaale mushahar qaata, laakiinse hawlwadeneyada badidooda lacag ma qaataan. Dhammaantoodana waxay tixgeliyaan xajinta sirta xirfada.

Liiska ururrada samafalka waxaad ka heleysaa halka ay ku qoran tahay faahfaahinta xiriirka Isbahaysiga ururrada ayaa ka caawin kara sidii aad ururradooda maxaliga u la xiriiri lahayd.

## Heeganka dhibbaneyaasha

Heeganka dhibbaneyaashu waxaa uu la shaqeeya dhammaan noocyada falalka denbiyada. Tusaale ahaan jirdil, guri-dhac, boorso dafid, faraxumayn, dhac-shaqsiyeed iyo handidaad. Kolka booliska dacawada la wargelinaayo waa in dhibbaneha la siiya warbixinta ku saabsan heeganada dhibbaneyaasha denbi-falka iyo dhaqdhaqaaqyada taageerada kale. Boolisku wuxuu dhibbaneha denbi-falka weydiinayaa haddii u doonaayo in heegan u la soo xiriiro.

Heeganka dhibbaneyaashu denbi-falka wuxuu dhibbaneha u soo bandhigi karaa helida qof taageere ah, badidooda waxay leeyihiin dhaqdhaqaaqa taageerada markhaatida. Ururka dalka oo dhan ka jiraa waa Heeganka dhibbaneyaasha denbi-falka ee dalka Iswiidan [Brottsofferjouren Sverige].

## Heeganka Dumarka

Heegannada dumarku waxay dumarka siyaabo kala duwan loo geystay denbi-fal, siiyaan taageero nafsi iyo taageero wax ku ool ah. Waxaa laga yaabaa in taageerada ugu muhiimsan ee heeganka dumarku u fidiyo haweenka ay tahay hoy ammaankiisa sugan yahay. Heegannada dumarka badidooda waxay bixiyaa talobixin xiriir la leh caddaaladda.

Waxaa jira laba urur-qarmeed oo kala ah: Urur qarmeedka heeganada dumarka iyo gabdhaha ee dalka Iswiidan, [Roks] iyo Isbahaysiga heeganada dumarka iyo gabdhaha ee dalka Iswiidan [SKR]. Labada ururba waxay leeyihiin heeganda gabdhaha iyo dumarka da'da yar.

Terrafem, waa urur heegen dumar oo loogu talogalay gabdhaha da'da yar iyo haweenka kaleba ee ajinebiga ah, wuxuu ka shaqeeyaa wadanka oo dhan, waxaana uu adeeggiisa ku bixyaa khadka telefoonka, iyada oo in ka badan 40 luqaddood ay ku talo iyo taagero bixiyaan.

## Heeganka ragga


Heeganka raggu wuxuu taageero siiyaa ragga dhibbaneha ah iyo ragga dhibka u geeystay dumarka. Kuwa dumarka dhibka u geystay, waxay ka caawiyaan, sidii uu wax ugu qaban lahaa seef la boodnimada una ciribtiri lahaa adeegsashada xooq-muquuniska.

# Maxkamadaynta

Markii dacwada maxkamada horteeda la keeno, waxaa la yiraahda [rättegång] ama [huvudförhandling]. Haddii aad codsatay magdhawga denbi-falka, isla maxkamadayntaas ayaa codsiga laga arrinsanaaya.

## Yeeritaanka maxkamadaynta

Dhibbaneha iyo eedeysaneha waxaa mar kasta la wargelin doonaa goorta maxkamadaynta ay dhici doonto. Haddii uu xeerilaaliyeha codsado in laga wareysto dhacdada ama aad magdhaw codsatay, waxaa lagaga yeeri doonaa maxkamadaynta. Haddii maxkamadda ku yeero waa inaad timaada.




Hab xasilan u aqriso warqadda yeeritaanka. Haddii aad xannuunsato ama aad aaminsan tahay inaad haysato sabab la qaadan karo oo aad maxkamadaynta uga qaybgelin, waa inaad daahid la'aan maxkamadaynta ka hor la xiriirta maxkamadda. Maxkamadda ayaa ku wargelin doonto haddii ka qaybgelidaada laga maarmi kara iyo haddii kale. Haddii aan lagu siin warbixin kale waa inaad tixgelisa wax qoraalka yeeritaanka ku qoran.

Haddii aad iman weydo, oona aadan haysan sabab la qaadan karo, waxaad bixinaysaa lacag ganaax, loo yaqaanno [vite], taasoo ku qoran warqadda yeeritaanka. Waxaa dhici kartaa in lagu soo diro ciidanka booliska oo u maxkamadda ku hor keeno.

## Maxkamadaynta

Maxkamadaynta waxaa ka qaybgeli doono garsoore, xeerilaaliye iyo eedeysaneha, kaasoo imminka loogu yeero eedsane [den tilltalade]. Xubnaha maxkamadda waxay badi ahaan ka kooban yihiin afar garsoore: garsoore xeerarka aqoon gaar u leh oo ah guddoomiyeha iyo saddex xubnood oo siyaasad lagu soo xulay, oo lagu magacaabo [lekmannadomare]. Intaas waxaa dheer xoghaye qoraalka maxkamadeynta diiwaangeliya, oo ka tirsan shaqaalaha maxkamadda.

Dadyoowga kale oo caadi ahaan ka qaybgala waa qareennada difaaca, dhibbaneha iyo markhaatiyada. Waxaa iyana intaas dheer, in adiga oo ah dhibbaneha iyo muddici ku wehliyo garyaqaanka dhibbaneha. Qaryaqaanka dhibbaneha wuxuu ku caawini doonaa maxkamadaynta kahor iyo xilliga maxkamadaynta. Haddii aad u baahan tahay qof turjubaan ah ayaa lagu qabanayaa, waxaan soo kaxayn kartaa qof taageere ah.

Maadaama aanay maxkamadaynta ahayn sir, qof kasta ayaa dhegaysi awgiis u booqan kara maxkamadda. Dadyoowga taageerada kugu yimid iyo dhegaystayaashu looma oggola inay hadlaan inta ay maxkamadaynta socoto. Haddii maxkamadeynta lagaga hadlaayo dacwo aad xasaasi u ah, wuxuu garsooruhu go'aamin karaa in qaar dadyoowga kamid ah ay qolka maxkamadayntu ku sugnaan karaan. Waxaa qaabkaas lagu magacaabaa maxkamadaynta albaabada u xiran.

Kolka maxkamadaynta ay bilaabato waxaa marka hore la dhageysanayaa arrimaha maxkamadaynta muhimka u ah. Xeerilaaliyaha ayaa ka sheekaynaayo sida denbi-falka u dhacay. Taasoo loo yaqaanno bandhigida arrinta [sakframställan] Markaas kaddib ayaa adiga oo ah dhibbaneha lagu dhegeysanayaa, kaddib eedaysanaha ugu dambeynna markhaatida.

Dhibbane ahaan, waxaad garab fadhiisanaysaa xeerilaaliyaha. Inta ay socoto maxkamadeyntu, haddii ay jirto arrinaad is-waydiinayso waxaad u jeesanaysaa dhinaca xeerilaaliyaha ama garyaqaanka dhibbaneha. Haddii aad magdhaw codsatay, taasina waa laga arrinsan doonaa. Fiiri halka ay ku qoran tahay magdhaw [Skadestånd].

Marka waraysi lagula yeelanaayo, waxaa lagu siin doonaa fursad aad ugu sheekayso wixii dhacay. Markaas kaddib, waxaa su'aallo ku weydiinaya xeerilaaliyaha iyo qareenka eedaysanaha. Xitaa garsooruhu su'aallo dhamaystirid ayuu ku waydiin karaa.

Waraysiga dhibbaneha, inta badan waa waraysi faahfaahsan. Taasoo xeerilaaliyeha muhim u ah in uu eedeysaneha ku caddeeyo denbi-falka. Sidaas awgeed, waa muhiim inaad dhacdoonka ka sheekayso hab aad u qeexan hadba inta aad ka xusuusato ama aad la kulantay, inkastoo haddana aysan ahayn arrin fudud. Waraysiyada oo idil waxaa laga duuba cod iyo fiidiyo.

Mararka qaarkood waxaad dareemaysaa inay dhib tahay inaad la kulanto eedaysanaha, mararka qaarkoodna waxaad dareemi kartaa cabsi. Haddii aad aaminsan tahay inaadan awoodin inaad wax kasta ka sheegto eedaysanaha hortiisa, waa inaad maxkamadaynta kahor wargelisaa maxkamadda, xeerilaaliyeha ama garyaqaanka dhibbaneha. Maxkamadda waxay go'aamin kartaa in eedaysanaha la geeyo qol kale, inta uu socdo wareysigaagu. Laakiin eedaysanaha waxaa uu xaq u leeyahay in uu samaacad ka dhegaysgto wareysigaaga.

Haddii aad cabsi ka qabto qof ka mid ah dhegeystayaasha, waxay maxkamaddu go'aaminaysaa in qofkas dibedda loo saaro, inta adiga wareysiga lagula yeelanaayo.

## Xukunka

Markii maxkamadaynta ay dhammaado waa in maxkamadda soo bandhinta xukunka dacwada. Mararka qaarkood go'aanka markiiba afka ayaa laga sheegaa, kaddib markii garsooreyaasha ay gooni ahaan arrinta ugu arrinsadaan. Inta badan waxaa xukunka la sugaa mudo ilaa laba todobaad ama xaaladaha qaarkood intaa in ka badan.

Maxkamadda ayaa laga helaa goorta xukunka la soo bandhigo doono. Maalintaa waxaa loola xiriiri karaa xafiiska maxkamadda lana waydiin karaa sida maxkamadda dacwada u xukuntay. Haddii aad codsatay magdhaw, si toos ayaa lagu siin doonaa. Qoraalka xukunka lacag la'aan ayaa boostada lagugu soo diri doonaa. Haddii kale, waxaad xeerilaaliyaha ama maxkamadda ka codsan kartaa in nuqulka lagu soo diro.

## Rafcaan qaadasho

Qofkii aan ku qanacsanayn go'aanka maxkamadda darajada koowaad, wuxuu rafcaan qaadasho awgeed la xiriiri karaa maxkamadda rafcaanka [hovrätten]. Warbixin ku saabsan sida rafcaanka loo qaato, waxay ku qoran tahay qoraalka xukunka. Xaaladaha qaarkood waa in qofku maxkamadaynta maxkamadda rafcaanka ka hor u haystaa ruqsadda ka arrinsashada [prövningstillstånd]. Haddii xukunka rafcaan laga qaato, waxay maxkamadda rafcaanka ku dhaqaaqaysa maxkamadayn cusub. Xaaladaha badidooda xilliga maxkamadaynta maxkamadda rafcaanka looma baahna goobjoogida dhibbaneha iyo markhaatida. Beddelkii waxay maxkamadda rafcaanka dhegaysan doontaa cajaladahii laga soo duubay maxkamadda darajada koowaad. Haddii dacwada ay fudud tahaya waxay maxkamadda rafcaanka go'aankeeda gaari kartaa maxkamadayn la'aan.

Xukunka maxkamadda rafcaanka rafcaan ayaa laga qaadan karaa. Taasoo lagala xiriiri karo Maxkamadda sare [Högsta domstolen]. Haseyeeshe, Maxkamadda sare waxay ka arrinsata oo keliya dacwooyinka u baahan in laga gaaro xukun tusaale u noqon dono maxkamadaha kale, kaasoo loo yaqaanno tixraaca xukunka Maxkamadda sare [prejudikat], ama haddii ay jirto sabab maxkamadaynta u gaar ah, tusaale haddii khalad culus u ka dhacay maxkamadayntii maxkamadda daraja koowaad ama maxkamadda rafcaanka. Sidaas awgeed, waxaa la oran karaa maxkamadda rafcaanku ayaa badi ahaan ah halka caddaaladda ugu danbeeyso ay taallo.

## Kharashka daqligii lummay markii qofku u ka qaybgalay maxkamadaynta

Haddii maxkamadda lagaga yeero, ee uu xeerilaaliyehu ku yeero, waxaad xaq u leedahay in lagu siiyo kharashkii ka qaybgelida awgeed ka baxay. Mararka qaarkood, markii wareysiga lagula yeelanayaa u dhammaado, wuxuu garsooruhu ku weydiinayaa, haddii aad wax kharash ah sheeganaysid. Haseyeeshe, caadi ahaan kharashyada noocaas waxaa maxkamadaynta kaddib lagala xiriiraa miiska macaamiisha. Waxaad markaas codsan kartaa kharashkii, waxaa lagu siinaayaa warbixin ku saabsan lacagta lagu siin karo.

Kharashka waxaa toos u bixiyo miiska macaamiisha ee maxkamadda. Haddii kharashku u badan yahay waxaa lagu horumarin karaa inyar, warbixin dheeraad waxaad kala xiriiri kartaa maxkamadda.

## Kharashyada kale ee maxkamadaynta

Haddii xeerilaaliyehu usan arrinta magdhawga ka caawinin, oona aadan lahayn garyaqaanka dhibbaneha, laft-ahaantaada ayaa codsiga magdhawga soo bandhigi kara. Haddii kharash u kaaga baxay, tusaale yeelanshada qof qareen ku gaar ahaa, ama uruurinta caddaymaha waxaad xaaladaas xaq ku leedahay in eedaysaneha u ku siiyo kharashyadaas.

Haddii eedaysanahe lagu xukmiyo in uu magdhawgii la codsaday uu bixiyo, nidaamka guud waxaa weeyaan in uu bixiyo kharashyada maxkamadaynta adiga ku gaar ahaa.

### Dugsiga maxkamadaynta

Warbixin dheeraad ku saabsan maxkamadaynta, muqaalka qolka maxkamadaynta iyo warbixinno kale waxaa ka heleysaa dugsiga shabakadda internetka Hey'adda Ammuuraha Dhibbaneyaasha **www.rattegangsskolan.se**. Luqadaha dugsiga maxkamadaynta af-iswiidish iyo af-ingriisi.

# Magdhaw, caymis iyo gunnada dhaawaca denbi-falka

Qofka denbi-falka gala waxaa guud ahaan waajib ku ah in uu bixiyo dhaawacyada denbi-falka sababay. Taasoo loo yaqaanno [skadestånd] Haddii aad caymis ku jirto, caymiska ayaa bixinayo qayb ka mid ah kharashyada dhaawacyada. Haddiise faleha usan awoodin inuu magdhawga u bixiyo, adiguna aadan lahayn caymis, dowladda ayaa mararka qaarkood bixisa, lacag lagu magacaabo gunnada dhaawaca denbi-falka [brottsskadeersättning] Xitaa haddii faleha aan la garanayn, waxaad xaq ku leedahay gunnada dhaawaca denbi-falka iyo caymiska.

## Magdhaw

### Codsashada magdhawga

Guud ahaan waxaad xaq ku leedahay inaad codsato magdhawga dhammaan dhaawacyada denbi-falka sababay. Codsiga magdhawga waxaa laga arrinsada isla xilliga maxkamadda ay ka arrinsanayso denbi-falka eedaysaneha lagu soo oogay.

Waa in dhibbaneha u eedaysanaha ka codsada gunnada dhaawaca denbi-falka sababay. Sida lagugu fududeeyo awgeed, wuxuu xeerilaaliyeha soo diyaarinaya hawlaha u magacaaga ku codsan doono magdhawga, waa haddii aad sidaas codsato. Xeerkaas waxaa ka reeban magdhawga u baahan in baaritaan ballaaran lagu sameeyo ama haddii codsiga u yahay mid aan xaqiiqada ku salaysnayn. Sida haddii codsiga magdhawga usan shaqo ku lahayn denbi-falka ama u aad u badan yahay haddii la barbardhigo magdhawga la bixiyo xaaladaha lamid ah.

Haddii aad dooneyso in magdhaw laga siiyo dhaawaca ka soo gaaray denbi-fal, waa inaad sheegataa maalinta ugu horreysa u ciidanka booliska wareysiga ku la yeelanayo. Isla maalintaas waa inaad wargelisaa haddii aad doonayso in xeerilaaliyeha u arrintaas ka caawino.

### Waajibka bixinta magdhawga ee xilhaayeha xannaanadda/waalidka

Waalidiinta carruurtooda denbi-fal awgiis dhaawac sababay waxa waajib ku ah bixinta magdhawga falka carruurtooda. Mas'uuliyaddda waxay ku saabsan tahay dhawaac, waxyeelida hantida iyo meelkadhaca. Mas'uuliyaddda xilhaayeha xannaanadda/waalidka waxay ku xadadan tahay ugu badnaantii shan meeloodka qiimaha xaddiga lacageed ee saldhiga ah [prisbasbeloppet] ee dhacdoonka waxyeel kasta.

Sidaas awgeed, haddii qof da'diisa 18 sano ka hooseeyso u denbi-fal ku geysto waxaad magdhaw ka codsan kartaa da'yarka iyo xilhaayeha xannaanadda/waalidka. Nidaamka wuxuu khuseeyaa denbi-falka dhacay wixii ka danbeeyay taariikhda 1 setembar 2010. Warbixin dheeraad waxaad kala xiriiri kartaa xeerilaaliyaha ama Hey'adda Ammuuraha Dhibbaneyaasha.

### Habka lagu qaato magdhawga

Kolka maxkamaddu ku xukunto eedaysanaha in ku siiyo magdhaw, micneheedu ma aha in lacagtaas isla markiiba lagu siinayo. Waxaa badanaa dhacda in aan eedaysanehu bixin karin ama uu diido inuu bixiyo lacagtaas. Bixinta magdhawga waxaa ka caawin karto Hey'adda Hantidhawrka.

Maxkamadda ayaa si toos ah ugu dirta nuqulka xukunka Hey'adda Hantidhawrka oo kaddib warqad kugu la soo xiriireysa oo ku weyddiineysa haddii aad dooneyso in laga caawino soo ururinta magdhawga. Waxayna ku soo direysaa warqad aad buuxineyso oo dib ugu celineyso Hey'adda Hantidhawrka. Kaddib waxay hey'adda baareysaa xaaladda dhaqaale ee eedaysanaha. Haddii ay u aragto in eedaysanaha u haysto hanti ama dhaqaale uu ku bixin karo magdhawga, waxay hey'adda ku dadaaleysaa in magdhawga lagu siiyo.

Caawimaadda Hey'adda Hantidhawrka waa lacag la'aan, waa haddii aysan jirin xaalad aad u gaar ah. Haddii aadan doonayn in Hey'adda Hantidhawrka aysan kula soo xiriirin wa inaad adiga khadka taleefanka 0771-73 73 00 kala xiriirta.

## Caymiska

Haddii aan la aqoon qofka denbi-falka galay ama haddii fale la xukmiyay usan magdhawga bixin karin waxaad xaq ku leedahay in gunno lagu siiyo.

Dadyoowga badankood waxay leeyihiin caymis ka caymiya dhaawacyada ka soo gaara denbi-falka. Caymiska gurigu wuxuu magdhaw ka bixin karaa waxyaalaha la xado, jirdil iyo denbi-falka ku salaysan jinsiga. Dadyoowga badidooda waxay leeyihiin caymiska shilalka, tusaale heshiis ay ka galeen uruurka shaqaalaha, kaasoo ka heli karaan magdhawga dhaawac-shaqsiyeedka sababay denbi-fal. Dadyoowga badidooda waxay leeyihiin caymiska suuqa shaqada, kaasoo caymiyaa dhaawacyada shaqada.

Shuruudaha caymisyada badankood waxa kamid ah inaad adigu caymiska ka bixiso qayb, kaasoo loo yaqaanno [självrisk]. Waxaa jira shuruudo kale oo xadadaynaya xaq u yeelanshada gunnada. Warbixin dheeraad ku saabsan caymiskaaga waxaad kala xiriiri kartaa shirkadda caymiska. Waa muhim inaad denbi-falka kaddib daahid la’aan wargeliso shirkadda caymiska wixii dhaawac ahaa ee ku soo gaaray.

## Magdhawga dhaawacyada denbi-falka

Haddii denbi-faleha la xukmiyay usan magdhawga bixin karin, oona aysan jirin caymis ku filan magdhawga, waxaa xaq ku lahaan kartaa in dowladda ay magdhawga ku siiso. Magdhawga noocaas ah waxaa loo yaqaanna gunnada dhaawaca denbi-falka, waxaana mas’uul ka ah Hey’adda Ammuuraha Dhibbaneyaasha.

Markii faleha denbiga aan la garanayn waxay helida magdhawga dhaawacyada denbi-falka suurtagal noqon kartaa haddii baaritaan la sameeyay, kaasoo loo yaqaanno hordhaca baaritaanka denbi-falka, kaasoo lagu muujiyo in denbi-fal lagu geystay oona dhawaaca shil u sabab ahayn. Denbi-falka waa in mar kasta ciidanka booliska la wargeliyaa. Haddii eedaysanaha la yaqaan, waa in xukun ciqaab ama ganaax ku salaysan u dhaco.

Magdhawga dhaawacyada denbi-falka wuxuu ka hirgalay oo keliya denbi-fal dalka Iswiidan ka dhacay, had iyo jeer xaq ayaa ku leedahay haddii aad dalka ku nooshahay ama dalxiise ama arday ahaan ku joogtay markii falka lagu geystay. Haddii hoygaaga u dalka Iswiidan ku yaallo, waxaad xaq ku yeelan kartaa magdhawga dhaawacyada denbi-falka xitaa haddii denbi-falka u ka dhaco dal dibada ku yaallo.

### Dhaawacyada-shaqsiyeed

Dhaawacyada-shaqsiyeed waxay noqon karaaan dhawaaca jirka ama maanka ee qof loo geystay Haddaba, haddii adiga lagu geystay dhaawaca-shaqsiyeed waxaa xaq u lahaan kartaa magdhawga:

- kharashka daryeelka takhtarka, daawaynta wada-hadalka ku salaysan iyo kharashyada kale ee dhaawaca xiriirka la leh
- Daqligii ka lummay
- hur iyo xannuun, tusaale xannuun ama dhibka xilliga jirrada oo aan joogto ahayn
- dhaawaca joogtada ah, tusaale dhaawaca ilko caafimaad qabay, arag- ama maqaldarro.

Haddii lagu siiyo magdhawga dhaawac-shaqsiyeedka waxaad kaloo xaq ku leedahay magdhawga waxyeelkii dharka, okiyaalaha, ilkaha caagga ka samaysan ama waxyaalahii kale oo aad sidatay markii denbi-falka lagu geystay. Haseyeeshe, xaq kuma lihid magdhawga lacag caddaan ah oo waxyeelmay ama ka lummay, dahab iwm, mobiil ama boorsada jeebka.

### Meelkadhac

Denbiyo badan ayaa laga bixiyaa magdhawga meelkadhac. Taasina waxaa xaq loo yeelan karaa kolka falka denbi loo arko inuu sababay xadgudub lagu xadgudbay sharaftaada, noloshaada iyo haybadaada. Xaaladaha meelkadhacyada badidooda waa kuwa ku salaysan falalka jinsiga, falalkaas ayaa sababa xaq u yeelanshada magdhawga meelkadhaca. Waxay kaloo noqon karaan kuwa jirdilka ku salaysan, tusaale jebinta mamnuuca xiriirka guriga, handadaad, dhac tixelin la’aanta mamnuuca xiriirka.

## Waxyeelka shayga iyo hantida

Hab sahlan laguma helo magdhawga waxyeelada shayga ama hantida, tusaale xatooyada ama khiyaanada. Magdhawga noocyadaas waxaa la heli karaa oo keliya haddii faleha u xilliga denbi-falka ku sugnaa xabsi, goobaha dhallinyarada lagu daryeelo ama dadyoowga isticmaala waxyaalaha maanka dooriya amase ku jiro siihaynta. Denbi-falka wuxuu dhici karaa goor uu goobahaas ka soo baxsaday ama fasax awgiis dibada ugu soo baxay.

Magdhawga waxyeelada qalabka iyo hantida oo qofka geystey uusan ka mid ahayn dadyoowgas ama aan la aqoon, waxaa la bixin karaa haddii ay jirto xaalad aad u gaar ah, tusaale sida haddii waxyeeladaasi ay culays u keeneen awoodi masruufkaaga iyo kan qoyskaga.

## Carruurta goobjoog ka ahaa fal xooq-muquunis ku salaysnaa

Carruurta goobjoog ka ahaa dhacdoo xoog muquunis ku salaysnaa, falehana u qoyska ka tirsanaa, waxay xaq ku lahaan karaan magdhawga dhaawaca fal-denbi-falka. Waa haddii denbi-falka u waxyeelay ammaanka iyo kalsoonida u cunugga u qabay qofka ehelkiisa ahaa. Waxaa la oran karaa dowladda ayaa mas'uul ka ah bixinta magdhawga carruurta, goobjoog ka ahaa dhacdoon xoog muquunis ku salaysnaa, falehana u qoyska ka tirsanaa. Xitaa haddii cunugga usan magdhaw ka heli karin faleha.



Waa in da'da cunugga ay ka hooseeysay 18 sano markii denbi-falka u dhacay. Ereyga "goobjoog ka ahaa" waxaa laga wadaa in cunugga u arkay ama maqlay denbi-falka. Xaaladaha loola jeedo in cunugga u goobjoog ahaa, tusaale ahaan waxay noqon kartaa goor qof qaraabo ah ama waalid ah u waalid kale u geystay fal jirdil ama handadaad ku salaysan. Waxay noqon kartaa xoog muquunis loo geysto qof walaalahiisa ka tirsan.

## Codsashada

Sida loo bixiyo gunnada dhaawaca denbi-falka awgiis waa inaad buuxisaa foom arrintaas gaar ahaana loogu talagalay. Foomka noocaas ah waxaa laga dalban karaa Hey'adda Dhibbanayaasha denbi-falka. Teeda kale, waxaad codsashada ku dhaqaaqi kartaa adigoo adeegsanaayo shabakadda internetka ee hey'adda www.brottsoffermyndigheten.se. Codsiga waa in uu Hey'adda Dhibbanayaasha denbi-falka Soo gaara saddex sannadood gudahooda, taasoo laga soo bilaabo taariikhda la soo gabagabeeyay dacwada. Taasoo micneheeda ah, in qofku u haysto fursad saddex sannadood ah, laga soo bilaabo taariikhda u xukunka hirgalay, oona rafcaan laga qaadan karin ama taariikhda hordhaca baaritaanka denbi-falka la joojiyey. Haddii aan la samayn hordhaca baaritaanka denbi-falka, waxaa codsiga lagu soo gudbinayaa muddo saddex sannadood gudahood oo laga soo bilaabo taariikhda u falka denbigu dhacay.

Mararka qaarkood waxaa dhici kara in codsi waqtigaa kaddib la helay wax laga qabto. Carruurta goobjoog ah markii u denbi-fal dhacay, ama iyaga loo geystay waxay mar kasta xaq ku leeyihiin gunnada dhaawaca denbi-falka ilaa ay ka buuxsadaan 21 sano.

Warbixin dheeraad ku saabsan gunnada dhaawaca denbi-falka waxaad kala xiriiri kartaa Hey'adda dhibbaneyaasha ama xeerilaaliyaha. Waxaa kaloo la xiriiri karta heeganka dhibbaneyaasha denbi-falka iyo heeganka dumarka si lagaga caawinno arjiga codsiga. Luaqadaha foomka waa af-iswiidish iyo af-ingriisi.

Hey'adda Dhibbanayaasha waxaa laga hela warbixin loogu talagalay dhibbaneyaasha denbi-falka oo ku qoran luqado kala duwan oo badan.

## Soo kabsashada

Hadafka wuxuu yahay in faleha u koor iyo hoos bixiyo magdhawga lagu leeyahay. Hey'adda Ammuuraha Dhibbaneyaasha waxay isku dayaysaa in goor danbe ay faleha ka qaadato magdhawga dhaawaca denbi-falka ay bixisay oo ay siisay dhibbaneha.

# Badbaadin-shaqsiyadeed

Waxaa jiraan waxkaqabadyo sare loogu qaado ammaanka dadyoowga fal hanjabaad ku salaysan loo geystay. Haddaba sida tallaabooyinkani si fiican ugu dhaqangalaan awgood waxaa muhiim ah in la la qorsheeyo ciidanka booliska, iyo wakiilada maamulka adeegga bulshada iyo dugsiga. Ciidanka booliska iyo Hey'adda Canshuuraha waxay iyagana bixiyaan tallooyin ku saabsan sidii qofku uu isagu ugu xoojin laha ammaanka nolol-maalmeedkiisa.

## Mamnuuca xiriirka

Waxaa xiriirka loo mamnuuca sidii looga hortago xaalado halis dhibbaneha denbi-falka u noqon kara. Mamnuuca xiriirka waxaa loo hirgeliyay sidii haweeneyda looga ammaangeliyo hanjabaad iyo dhibaataynta qof saygeeda ama la nooleheeda ahaan jiray. Xitaa sida loo ammangeliyo carruurta iwm darteed ayaa mamnuuca xiriirka loo hirgelin karaa. Micneha mamnuuca xiriirka waxa weeye in qofka ku caga-juleeyay laga mamnuuco inuu ku soo booqdo, ku dabagalo ama si uun xiriir ku la yeesho. Xiriirka waxa ka mid noqon kara isagoo warqad ku soo dira ama fariinta taleefanka gacanta ama taleefan ku soo dira ama saaxiibo kala soo xiriira. Mamnuuciddaa waxa lagu kordhin karaa in laga mamnuuco inuu yimaado agagaarka gurigaaga, goobta shaqada iyo meelo kaloo aad mar walba tagto.

Mamnuuca xiriirka wuxuu kaloo khusayn karaa qofka la nool qofka loo hanjabay. Mamnuuca noocaas ah oo looga mamnuuco qofka wax handada guriga lagu wadanool yahay, wuxuu hirgeli karaa haddii ay jirto halis wayn oo xiriir la leh noolasha, caafimaadka ama wakhtilummiska qofka kale.

Xeerilaaliyaha ayaana go'aamiya mamnuuca xiriirka. Haddii uusan xeerilaaliyeha gaarin go'aanka mamnuuca xiriirka, waxaa maxkamadda laga codsan karaa in arrinta ay ka arrinsato. Qofka jebiya mamnuuca xiriirka waxaa lagu xukumi karaa ganaax ama xabsi ugu badnaan hal sano.

## Waajika wargelinta ee Hey'adda Asluubta

Haddii qof fal-denbi kugu sameeyey la xukumo oo uu xabsi ku jiro ama lagu hayo goobaha lagu daryeelo dadyoowga cudurrada nafsiga qaba, waxaa Hey'adda Asluubta waajib ku ah in ay ku wargeliso haddii qofkaasi fasax u qaato ama uu baxsado ama xabsi kale loo beddelo amase la siidaayo. Dhibbane ahaan waa in lagu weyddiiyaa inaad dooneyso in lagu siiyo warbixinadaas.

## Hoy ammaankiisa sugan

Dumarka iyo carruurtooda lo geystay fal xooq-muquunis ku salaysan, kasoo faleha u yahay qof qoyska ka tirsan waxay xaq ku lee yihiin in la dejiyo hoy ammaankiisa sugan Hoyga ammaankiisa sugan waxaa laga hela Dowladda hoose iyo Heeganka dumarka. Warbixin dheeraad waxaad kala xiriiri kartaa Maamulka adeegga bulshada ee degmada ama Heeganka dumarka ee degmada.

## Warbixin-shaqsiyadeed badbaadsan

Haddii aad u baahan tahay in lagu siiyo adrees qarsoodi ah, taasoo u sabab ah handadaad ama dhibaatayn kale, waxaa gaar ahaan loo calamadaynayaa oo la qarinayaa warbixinta adreeskaaga, kaddib laga qorayaa diiwaanka dadweynaha. Calaamadaynta iyo qarinta warbixinta adreeskaaga waxaa kaloo laga diiwan gelinayaa diiiwanka guud, tusaale diiwaanka baabuurka iyo ruqsadda gaadiid wadida.

Habka kale oo lagu qariyo warbixin-shaqsiyeedka qofka hoygiisa ka guuro ama ku talo jiro in uu guuro, waxa weeye in diiwangelinta guud aan waxba laga beddelin, taasoo loo yaqaanno [kvarskrivning].

Warbixin-shaqsiyadeedka badbaadsan sida diiwangelinta guud aan waxba laga beddelin iyo calaamadaynta iyo qarinta warbixinta adreeskaaga waxaa laga codsan karaa xafiiska canshuuraha oo ku yaal degmada aad ku qoran tahay. Mar kasta oo aad hey'ad dowladeed la xiriirayso waa inaad wargelisaa in warbixin-shaqsiyeedkaaga ay qarsoon yihiin. Teeda kale, hab aad u taxadarsan ku dhaqan goorta ururrada, shirkadaha iwm aad xiriir la yeelanayso.

## Magac-beddelid

Tallaabooyinka kale ee lagu xoojiyo ammaanka waxa weeyaan iyadoo magaca la iska beddelo. Haddii loo beddelanaayo magaca saddexaad/qoyska ee waalidka waxaa codsi loo qoranayaa Xafiiska Canshuuraha. Haddiise loo beddelanayo magac saddexaad/qooys kale waxaa ruqsad la weyddisanayaa Wakaladda Shatiyada iyo Diiwaangelinta [Patent- och registreringsverket].

## Qalabyada digniinka

Handadaada loo geystay dadyoowga qaarkood waxay noqon karaan halis, taasoo sababayso in ay adeegsadaan qalabyada digniinka. Qalabyada digniinka waxay ka kooban yihiin taleefanka gacanta iyo hab-dhiska qalabyada digniinka, kuwaaso codsi gaar ah kaddib laga amaahan karo ciidanka booliska.

## Warbixin-shaqsiyadeed aan jirin

Handadaada halis gelinayso nafta, caafimaadka iyo xurriyada haddii ay jirto waxaa la adeegsan karaa warbixin-shaqsiyeed la abuuray. Waa markii aysan jirin siyaabo kale oo ammaanka qofka lagu sugi karo. Ruqsadda adeegsashada warbixin-shaqsiyadeedka aan jirin waxaa laga codsada Taliska Ciidanka booliska.

# Fal-celinta dhibbaneyaasha denbi-falka

Denbi-falka wuxuu abuuri karaa dhawr cawaaqib aan wanaagsanayn. Waxay noqon karaan kuwa dhaqaale ku saabsan, dhaawac jirka, falcelinta maanka ama dhibaato xiriir la leh dhexgalka bulshada. Teeda kale, wuxuu denbi-falka badi ahaan sababa dhibaatooyin la taaban kara.

Sida iyo heerka u qofku ugu falcelinaayo waa arrin hadba qofka arrina khuseeysa iyo qodobo kale oo kala duwan. Waxaana dareenkaga saamayn ku yeelan kara sida ay yihiin waxa dhacay, xiriirka aad faleha la leedahay, sida xaaladdaada bulshadeed u egtahay iyo shaqsiyadaada.

Iyadoo fiirogaar ah aan la siin nooca denbi-falka, ayaa haddana waxaa la oran karaa saamaynta caafimaadka maanka, ayay ahayd ujeedada in meel looga dhaco ama la dhaawaco, taasoo dhibbaneha hab sahlan wax uga qaban karin. Denbi-falka ku salaysan jinsiga wuxuu guud ahaan sababa falcelinta caafimaadka maanka xiriir la leh, waa haddii la barbardhigo falalka xoog-muquuniska ku salaysan. Kuwaaso iyagana ka culus kuwa hantida ku saabsan.

Waxaana caadi ah in qofku u dareemo ceebta wixii dhacay, inkastoo faleha u mas'uul ka yahay denbi-falka. Waxaa kaloo caadi ah nacayb loo qaado qofka denbi-falka galay oo lagu hamiyo in laga aarguto.

Waxaana habboon in laga hadlo wax dhacay oo la la hadlo qof lagu kalsoon yahay. Taasina waxay keentaa in fekerka la ururiyo oo la fahmo waxa dhacay.

Qof kasta hab u gaar ah ayuu u falceliyaa. Denbiyo isku mid ah ayay siyaabo kala duwan u saameeyaan dadyoowga, taasoo ku xiran xaaladda noloshooda, waaya-aragnimada meelkadhaca iyo xoog-muquunis. Qofka dhowr jeer loo geysto falalka noocaas ah hab fudud u ma xaamili karo. Tusaale, qofka mar labaad dhac loo geysto wuxuu kala kulmayaa dhibaato adag, haddii la barbardhigo qofka weligii falka noocaas ah loo geysan. Siiba haddii dhacii hore u qofku weli ka soo kabsan.

Xoog-muquuniska qaraabada ka dhexdhaca, sida haweenka oo hab culus lagu xadgudbo ama xadgudubka jinsiga ku salaysan ee carruurta loo gesto, waxay noqdaan xaalado aad u culus maadaama falalka noocaasi ah ay badi ahaan soo noqnoqdaan. Teeda kale, maadaama goobta u denbiga ka dhaco badi ahaan ay tahay hoyga, waxay sababaysa in dhibbaneha usan lahayn goob ammaan leh. Waxaa dareenka uga sii daran kolka qofka denbi-falka galay uu yahay qof aan laga maarmin dareen ahaan, bulsho ahaan iyo dhaqaale ahaan.

Kolka qofka marna jacayl loo muujiyo marna xoog loo sheegto waxay ku abuurtaa xiriir adag, laakiin waxay burburisaa dareenka xiriirka. Waxaa khatar ah in qofka denbi-falka geystey iyo kan laga galayba ay denbi-falka yaraystaan. Hab-dhaqan kale oo caadi ah waxaa weeyaan in qofka denbi-falka geystey in uu badanaa denbi-falka dusha ka saaraa, ee u ku dhaadhiciyo in dhibbaneha u sababy xadgudubka.

Qofka loo geystan denbi-fal, falehana u qoyska ka tirsan yahay, waxaa badi ahaan muhim u ah in u helo fursad u hab xasilan ugu fekero xaaladda u ku sugan yahay, taasoo u suurtagelin doonto qeexida xadgudubka iyo sidii xaaladiisa u wax ugu beddeli lahaa. Degmooyin badan waxaa laga hela hoy ammaankiisa sugan yahay.

Baahida taageero iyo caawimaad agaagaarka laga helo waa kolba si. Caawimaadda dhinaca caddaaladda ka sokkoow wuxuu qofku badi ahaan u baahn yahay taageero-shaqsiyeed. Haddii aad taageero iyo caawimaad u bahan tahay waxaad la xiriiri kartaa maamulka adeegga bulshada degmada ama mid kamid ah ururrada samafalka oo liiskoodu warqaddaan ku qoran yihiin.

# Faahfaahinta xiriirka

## Ururrada samafalka

**Xuquuq-bulshodeedka carruurta Barnens Rätt I Samhället, BRIS**
Lam. taleefanka BRIS: 116 111
Lam. taleefanka dadka waawayn BRIS: 077-150 50 50
info@bris.se
www.bris.se, www.barnperspektivet.se

**Heeganka dhibbaneyaasha dalka Iswiidan**
Lam. taleefanka heeganka: 116 006
Heeganka dhibbaneyaasha info@brottsofferjouren.se
Shabakadda internetka heeganka dhibbaneyaasha
www.brottsofferjouren.se

**Ururka waalidiinta carruurta falxummada jinsiga loo geystay Föreningen Anhöriga Till Sexuellt Utnyttjade Barn, ATSUB**
Lam. taleefanka heeganka: 08-644 21 12
info@atsub.se
www.atsub.se

**Urur-qarmeedka dhammaan xuquuqda jinsiga xiriirka la leh, kuwa isla jinsiga ka hela, kuwa labada ba ka hela iyo jinsigooda dhexdhexaadsan. Heeganka dhibbaneyaasha RFSL**
Lam. taleefanka heeganka: 020-34 13 16
stod@rfsl.se
www.rfsl.se

**Urur-qarmeedka heeganka dumarka iyo gabdhaha ee dalka Iswiidan, Roks**
info@roks.se
www.roks.se, www.tjejjouren.se

**Urur-qarmeedka xarunta taageerada falalka qofka ka sineystay ama u tagay qof uusan guursan karin, Rise**
Lam. taleefanka heeganka: 08-696 00 95
stod@rise-sverige.se
www.rise-sverige.se

**Ururka ammaanka carruurta**
kundservice@rb.se
www.raddabarnen.se

**Lanqayrta cas ee dalka Iswiidan**
info@redcross.se
www.redcross.se

**Ururu-qarmeedka heeganada dumarka ee dalka Iswiidan, SKR**
info@kvinnojouren.se
www.kvinnojouren.se, www.tjejjouren.se

**Terrafem** (waa urur heegan dumar oo loogu talogalay gabdhaha iyo haweenka shisheeyeha ah, wuxuuna adeegiisa ku salaysan yahay taageero iyo talobixin luqado badan)
Lam. taleefanka heeganka: 020-52 10 10
info@terrafem.org
www.terrafem.org

## Hey’adaha iyo waxkaqabadaha

**Hey’adda maxkamadaha**
Tal: 036-15 53 00
domstolsverket@domstol.se
www.domstol.se

**Hey’adda Hantidhawrka**
Xarunta macaamiisha, tal: 0771-73 73 00
kronofogdemyndigheten@kronofogden.se
www.kronofogden.se

**Xarunta haybada dumarka, NCK**
www.nck.uu.se
Dhaqdhaqaaqa NCK wuxuu ku salaysan yahay khadka taleefanka, Kvinnofridslinjen
Lam. taleefanka heeganka: 020-50 50 50
www.kvinnofridslinjen.se

**Ciidanka booliska**
Tal: 114 14
Gurmad wac: 112
www.polisen.se

**Hey’adda ammuuraha caddaaladda**
Tal: 060-13 46 00
rattshjalpsmyndigheten@dom.se
www.rattshjalp.se

**Hey’adda canshuuraha**
Tal: 0771-567 567
www.skatteverket.se (xiriiriyeha *Nalaga soo xiriir* ayaa ka heleysaa faahfaahinta xiriirka xafiiska canshuuraha degmada)

**Goleha ammuuraha bulshada**
Tal: 075-247 30 00
socialstyrelsen@socialstyrelsen.se
www.socialstyrelsen.se

**Degmooyinka iyo gobollada dalka Iswiidan, SKR**
Tal: 08-452 70 00
info@skr.se
www.skr.se (xiriiriyeha degmooyinka iyo gobollada dalka Iswiidan waxaa ka heleysaa faahfaahinta xiriirka maamulka adeegga bulshada degmada)

**Hey’adda xeerilaalieyaha**
Tal: 010-562 50 00
registrator.riksaklagaren@aklagare.se
registrator@aklagare.se

Waxaa kaloo la heli karaa taageero nooqcyo kale ah, tusaale xarunta taageerada loogu talagalay dhibbaneyaasha da’da yar, hoyga carruurta iyo hoyga ammaankiisa sugan. Warbixin dheeraad ku saabsan degmooyinka iyo gobollada dalka Iswiidan waxaad kala xiriiri kartaa maamulka adeegga bulshada.

# Liiska ereybixinta

## CIQAAB
Waa ciqaabta dowladda ay faleha denbiga ku xukunto. Ciqaabta waxay noqon kartaa ganaax, xabsi, xukun shuruudeysan, xukun kor ka ilaalin iyo in faleha lagu wareejiyo daryeelka gaar ah.

## CIQAAB GANAAX KU SALAYSAN
Xeerilaaliyehu wuxuu go'aamin kara ganaax haddii denbi-falku uu ahaa mid fudud uu faleha aqoonsaday.

## CIRIBTIRIDA EEDAYNATA DENBI-FALKA
Waa go'aanka xeerilaaliyeha in eedaysaneha aan maxkamadda horteeda la keenin, tusaale ahaan da'da yar ee faleha awgeed.

## DENBI
Waa fal ciqaab mudan kara sida hadba sharciga ku xusan.

## DENBI SOO OGID
Waxa weeye codsi ka yimaada xeerilaaliyaha ama shakhsi kale oo maxkamadda ka codsada in qof denbi ama denbiyo lagu oogo oo la xukumo.

## DHEXDHEXAADIN
Dhibbanaha iyo eedeysanaha oo inta ay isasa soo hor fariistaan ka wadahadlaan falkii dhacay iyadoo qof dhexdhexaad ah la joogo. Dhibbanaha iyo eedeysanahaba ikhtiyaar ayay u leeyihiin dhexdhexaadinta.

## DHIBBANE/MUDDICI
Qofka loo geystey fal-denbi ama dhaawac soo gaaray ayaa lagu magacaabaa muddici xilliga maxkamadaynta.

## EEDEYSANE
Qofka lagu soo oogay inuu denbi galay ayaa inta maxkamaddu socoto lagu magacaabaa eedeysane.

## GARYAQAANKA DHIBBANEHA
Waa qof sharciyada aqoon gaar u leh, badi ahaan qof qareen ah oo taageero qofka loo geystey denbi-fal culus. Kharashka garyaqaanka dhibbaneha dowladda ayaa bixisa.

## HORDHACA BAARITAANKA DENBI-FALKA
Waa baaritaanka denbi-falka ee u hogaaminaayo ciidanka booliska ama xeerilaaliyeha.

## KA ARRINSASHADA GUUD
Waa fadhiga maxkamadda sidii dacwad go'aan looga gaaro, waxaa kaloo loo yaqaanna maxkamadaynta.

## MAXKAMAD
Waa hey'ad xukunta falalka denbiyada. Maxkamadaha guud: maxkamadda hoose (darajada kowaad), maxkamadda rafcaanka (derejada labaad), Maxkamadda sare (derejada ugu sareeysa).

## MAXKAMADAYNTA DENBI-FALKA
Waa denbi-fal maxkamad la horkeeno.

## RAFCAAN
Waa codsi la soo gudbiyo kaddib markii xukunka dhacay aan lagu qanacsanayn oo la doonaayo in maxkamadda rafcaanka ay arrinta dib ugu arrinsato.

## XEERILAALIYE
Waxa weeye garyaqaan hoggaamiya hordhaca baaritaanka denbi-falka oo dowladda wakiil ka ah inta maxkamadda socoto.

## Hey’adda Ammuuraha Dhibbaneyaasha

waa hey’adda heer qaran mas’uul ka ah dhaqdhaqaaqyada hoos ku xusan:

- **Magdhawga wayeellada denbi-falka**
- **Keydka dhibbaneyaasha**
- **Xarunta aqoonta**
- **Waaxda dib u eegida**

Ujeedada guud waxay tahay in loo hawlgalo sidii sare loogu qaadi lahaa, xuquuqda dhibbaneyaasha denbi-falka, iyo in fiirogaar la siiyo baahidooda iyo danahooda.

Shabakadda internetka **www.brottsoffermyndigheten.se** waxaad ka aqrisan kartaa warbixin luqado badan ku qoran, kuwaasoo ku saabsan xuquuqda dhibbaneyaasha denbi-falka iyo hawlaha caddaaladda iyo faahfaahinta xiriiryada hey’adaha iyo ururrada samafalka ururrada.

Hey’adda Ammuuraha Dhibbaneyaasha waxaad ka heli kartaa jawaabta su’aalaha ku saabsan magdhawyada denbi-falka. Hey’adda ka wac **khadka adeegga 090-70 82 00**, xulo 4aad, kaddib waxaad wadahadal la yeelan doontaa qof gacanhaaye ka ah waaxda ammuuraha dhaawacyada denbi-falka.

**HEY’ADDA AMMUURAHA DHIBBANEYAASHA**
Box 470, 901 09 Umeå
Tal: 090-70 82 00
registrator@brottsoffermyndigheten.se
www.brottsoffermyndigheten.se
www.rattegangsskolan.se
www.jagvillveta.se

Riix 2015